



# Naga Caawi si aan u Abuurno Dugsiga Sare ee Jefferson oo Casriyeysan

## Raadinta Ka-qaybgalka Bulshada


Ka dib ansixinta Bond-ka 2020, PPS waxay horay ugu socotaa naqshadaynta dhismaha ee casriyaynta Dugsiga Sare ee Jefferson. Qorshaha mashruuca waxaa ku jira dib u habeyn weyn oo lagu sameeynayo dhismihii asalka ahaa ee 1909 iyo dhismayaal cusub oo lagu kordhinayo kambaska. PPS waxay hadda raadinaysaa tabaruceyaal si ay ugu biiraan Kooxda La-talinta Naqshadeynta Dugsiga Sare ee Jefferson (DAG).

## Ku biir Kooxda La-talinta Naqshadeynta Dugsiga Sare ee Jefferson (DAG)

Kooxda La-talinta Naqshadeynta Dugsiga Sare ee Jefferson waxay kulmi doonaan bishii hal mar ilaa ku dhawaad 6 bilood, waxaana ku jiri doona xubno matalaya ardayda, macallimiinta, ardayda qalin jabisay, xirfadlayaasha shirkadaha, waalidiinta, barnaamijyada dugsiga, wada-hawlgalayaasha goobta suurtagalka ah iyo/ ama raasamaal, maamulka dugsiga iyo wakiilka guddiga dugsiga. Kooxdani waxay ka qayb qaadan doontaa horumarinta naqshadaynta Dugsiga Sare ee Jefferson ee la casriyeeyay iyagoo siinaya jawaab celin ku saabsan tafaasiisha naqshadaynta iyo doorashooyinka ay soo jeediyaan kooxda mashruuca. Xubnaha DAG waxay qabtaan door la-talin oo keliya. Go'aannada faahfaahinta mashruuca waxaa mas'uul ka ah Xafiiska Casriyeynta Dugsiga oo kaashanaya Hoggaanka kale ee Degmada.

## Hadafka Kooxda La-talinta Naqshadeynta

Hadafka DAG waa in la sameeyo naqshadaynta dugsiga sare oo dhamaystiran, siman, midaysan iyo aragti leh oo ay weheliso ka qaybgalka bulshada dugsiga. Xubnaha waxa laga filayaa inay adeegaan dhawr bilood inta naqshadeynta lagu jiro.



QORSHAHA HADDA

## Ka qayb qaado & La socio

Si aad ugu biirto Kooxda La-talinta Naqshadeynta Dugsiga Sare ee Jefferson, fadlan booqo websaydka mashruuca halkan: <https://www.pps.net/JeffersonBond>. Waxaad sidoo kale baran kartaa macluumaad dheeraad ah iyo waxaad heli kartaa wararkii ugu dambeeyay.

Haddii aadan awoodin inaad ku biirto DAG waxaad weli heli doontaa fursado aad fikradaada ku dhiibato siminaarada naqshadeynta dadweynaha mustaqbalka iyo shirarka furan. Ku biir liiska boostada mashruuca Casriyeynta Dugsiga Sare ee Jefferson halkan [JHSBond@pps.net](mailto:JHSBond@pps.net).

**BUILDING OUR FUTURE TOGETHER.**

<https://www.pps.net/JeffersonBond> • [JHSBond@pps.net](mailto:JHSBond@pps.net) • 503-916-2222  
[www.facebook.com/pps.homepage/](https://www.facebook.com/pps.homepage/) @PPSConnect

Portland Public Schools  
 School Building Improvement Bond

